# FIN RASMIAH

# الجريدة الرسمية

Muqdisho, 1 Maarso 1977, L. 3

*Faaf. Rasmiga ah ee Xafiiska Garyaqaanka Guud ee Dawladda*

**BIL SOO BAXA** **جريدة شهرية**

5 hi i R waa
Shs
Janayo. u s yo 2
la
b


SAXID QALAD

Daabacid labaad Sharciga lam. 9 ee 3 Febraayo 1977 oo lagu soo saaray Faafinta Rasmiga ah lam. 1/2 ee 10.1.1977

# KOOBNIIN

## BOGGA KOOWAAD

### SHARCI


L. 17 ee 3 Feb.1977, *Dhisidda Wasaaradda Kal uumeysiga.* Bogga 211

SHARCI L. 18 ee 3 Feb. 1977 *Dib- u Cusbooneysiinta Dhisidda ururka Haweenka Soomaaliyeed.* » 213

L. 19 ee 3 Feb. 1977, *Dib u cusbooneysiinta Dhisidda Xiriirka Ururrada Shaqaaqqlaha Soomaaliyeed.* » 216

ee 3 1977, *Dib u* 219

## BOGGA LABAAD

### X E E R


XEER MADAXWEYNAHA J.D.S. ee 5 Feb. 1977, *Magacaabid Wasiirka Wasaaradda Shaqada iyo Amuuraha bulshada L. 18* » 222

XEER MADAXWEYNAHA J.D.S. ee 5 Feb. 1977, *Magacaabid Wasiirka Wasaaradda Isboortiga L. 19* » 223

XEER MADAXWEYNAHA J.D.S. ee 5 Feb. 1977, *Magacaabid Wasiirka Wasaaradda Kalluunka L. 20* » 224

XEER MADAXWEYNAHA J.D.S. ee 5 Feb. 1977, *Magacaabid Wasiirka Dawladda ee Madaxtooyada L. 21* » 225

XEER MADAXWEYNAHA J.D.S. ee 5 Feb. 1977, *Magacaabid Wasiirka Wasaaradda Gaadiidka Badda iyo Dekedaha* L. 22 » 226

XEER MADAXWEYNAHA J.D.S. ee 3 Feb. 1977, *Dhisidda Xoghaynta Guddiga Siyaasadda L. 23* » 227


## BOGGA SADDEXAAD

### TALOOYIN ISGAARSIIN OGEYSIIS IYO WIXII LA MID AH


MAXKAMADDA GOBOLKA BANAADIR 15.2.1977, *lumid buugga kaydka L. 904 ku qoran Sh. SO. 138, uu leeyahay Nuur Xuseen Jimcaale L. 87* » 229

MAXKAMADDA GOBOLKA BERBERA 2.2.1977, *lumid jeeg wareega L. 135436 ku qoran Sh. S. 1807, uu leeyahay Cusmaan Maxamed Xasan L. 88* » 230

MAXKAMADDA BOOGLKA BANAADIR 1.3.1977 *Lumida jeegga Wareega L. 004599 ku qoran Sh. SO.* 1.700 uu leeyahay Maxamed Jaamac Diiriye L. 88 | Bis » 231

MAXKAMADDA GOBOLKA BANAADIR 1.3.1977 *ogeysiin Shirkadda Beertacabka S.R.L.*

88/Bis




## BOGGA KOWAAD

### S H A R C I

L. 17 ee 3 Feb. 1977, Dhisidda Wasaaradda Kalluumaysiga.

MADAXWEYNAHA

J. D. S.

Xaashida 1aad, 2aad, iyo tan 3aad ee kacaanka

: ... lam. 17 18 ... ee 1da Luulyo ... oo loo wareeji-

... ee ... lam. 14

... Badda iyo ... la xiriira kalluu-

Inay

Dhexe ee Xisbiga

SHARCIGA SOO SOCDA:

Qidobka 1aad

*Dhisidda Wasaaradda Kalluumeysiga*

... 3 Febaraayo 1977, waxa la dhisay Wasaa-

... waa Wasaarad dhaqaaleed loona khayraadka Badda.

Qodobka 2aad

Ujeedooyinka iyo Hawlaha Wasaaradda

hawlaha loo dhisay Wasaaradda Kalluumeysiga

Inay fuliso siyaasadda iyo barnaamijka XHKS ka leeyahay xagga Kalluumeysiga iyo wixii la xidhiidha.
In ay abuurto dhaqan-dhaqaale badeed oo hantiwadaag ah.
Inay habayso ka faa'iideysiga khayraadka badaheenna.
Inay abaabusho, taabbageliso, heer sare oo isku-fillaansho ahna gaadhsiiso Iskaashatooyinka Kallumeysatada, kuwaas oo noqonaya bulshooyin hantiwadaag ah oo ku dhisan shaqo iyo caddaalad xubin kastana lagu abaalmarinayo shaqada ay u qabato tiradeeda iyo tayadeeda (inta ay le'egtahay iyo nooca ay tahay).

5. In ay dejiso, laylido, una abuurto shaqooyin xubnaha danwadaagaha Kalluumeysatada si ay u gaadhaan isku-fillaansho una noqdaan bulshooyin hantiwadaag ah oo ku dhisan shaqo, si siman oo wax soo saarka ku qaybsada qof kasta shaqada uu u qabtay bulshada iyo tayadeeda.

6. Inay dhisto maamushana Dugsiyada Sare ee Badda oo lagu diyaariyo kawaadir heer kasta leh.

7. Inay abaabusho warshado lagu dhiso Doonyaha, Maraakiibta iyi qalabka Kalluumeysiga ee casriga ah.

8. Inay dhisto qalabka Farsamada sida tallaajadaha iyo dekedaha kalluumeysiga.

9. Inay dhisto gaadiid badeed oo kalluumeysi.

10. In lagu faafiyo kalluun cunidda dadweynaha Soomaaliyeed, lana gaadhsiiyo suuqeyntiisa magaalooyinka waaweyn oo dhan iyo meelaha beeraleydu ku badan yihiin iyada oo loo abuurayo qalabkii suurtagelinayey fidintiisa.

11. In la habeeyo lana xoojiyo kalluunka ganacsigiisa dibedda si uu u soo geliyo dalka lacag adag.

12. Inay la dagaallanto wasakhaynta Badda iyadoo raacaysa sharciyada Caalamiga ah ee badaha.

13. Inay samayso Xeerar ku saabsan habka Kalluumeysiga ee dalka iyo inay habayso bixinta ruqsadaha Kalluumeysiga.

Qodobka 3aad

Madaxweynaha J.D.S. wuxuu soo saari doonaa Xeer nidaamiye oo faafin doona sharcigan isagoo dhegeystey Wasiirka Wasaaradda Kalluumeysiga.

Qodobka 4aad

*Sharcigan wuxuu dhaqan gelayaa 3 Feb. 1977.*

Sharcigan waxaa lagu soo saari doonaa faafinta Rasmiga ah ee Qaranka.

Muqdisho, 3.2.1977,

Madaxweynaha Jamhuuriyadda D. Soomaaliya
*(Jaalle S/Gaas Maxamed Siyaad Barre)*

SHARCI L. 18 ee 3 Feb. 1977, Dib u cusbooneysiinta dhisidda ururka Haweenka Soomaaliyeed.

MADAXWEYNAHA

J. D. S.

ISAGOO ARKAY: Xaashida 1aad, tan 2aad iyo tan 3aad ee Kacaan ka 21ka Oktoobar 1969;

ISAGOO ARKAY: Sharciga lam. 40 ee 26 Maarso 1972;

ISAGOO ARKAY: Sharciga lam. 19 ee 1da Luulyo 1976 oo ku saabsan ku wareejinta Xisbiga Hantiwadaagga Kacaanka Soomaaliyeed Xukunka iyo Awoodda Dalka;

ISOGOO ARKAY: Horukaca uu gaaray Ururka Haweenka Soomaaliyeed xagga garaadka Siyaasiga, qaabka dhismaha iyo abaabulka iyofirfircoonida uu ka muujiyey Shirarka iyo hawlaha haweenka heer Qaaradeed, heer Gobol iyo heer caalami intaba;

ISAGOO TIXGELINAAYA Guulihii waaweynaa uu kacaanku ka gaaray abaabulka iyo diyaargareynta hawlkareen Dumar oo diyaar iyo daacadba u ah ku hoggaaminta hawlaha iyo xilka Ururka Haweenka ruuxa Barnaamijka Xisbiga Hantiwadaagga Kacaanka Soomaaliyeed iyo Falsafadda Kacaanka 21 Oktoobar 1969;

Isagoo Aqoonsaday: In ay tahay lagama maarmaan in dib loo habeeyo Barnaamijka, Xeerka iyo Qaabka Dhismaha Ururka Haweenka Soomaaliyeed si uu u noqdo mid qaab iyo dhuux ahaanba ugu habaysan fulinta Barnaamijka Xisbiga Hantiwadaagga Kacaanka Soomaaliyeed iyo gudashada waajibaadaka laga xilsaaray xiliga cusub

MARKUU DHEGEYSTAY: Talada Golaha Wasiirada;

MARKUU ARKAY: Oggolaanshaha Guddiga Siyaasiga ee Golaha Dhexe ee X.H.K.Soomaaliyeed.

WUXUU SOO SAARAYAA

SHARCIGA SOO SOCDA:

Qodobka 1aad

Marka laga billaabo 11ka Jannaayo 1977 waxaa dib loo habeeyey Dhismaha Ururka Haweenka Soomaaliyeed.

Qodobka 2aad

Ururka Haweenka Soomaaliyeed Xaruntiisu waxay noqoneysaa Muqdisho, wuxuuna ka furan karaa laamo Goboloda, Degmooyinka iyo Tuulooyinka Dalku uu ka kooban yahay.

Qodobka 3aad

Ururka isagoo fulinaya Barnaamijka iyo Xeerka Xisbiga Hantiwadaagga Kacaanka Soomaaliyeed ayaa hawlihiisa ugu waaweyn oo loo xilsaaray noqonayaan kuwa soo socda:

1. Difaaca Waddanka iyo ilaalinta guulihii kacaanka 21 Oktoobar 1969; isagoo tixgelinaaya dhibaatooyinkii Dalka yiiLay Kacaanka ka hor gaar ahaan kuwii haystay Dhallinyarada iyo sidii uu kacaanku ugu hawlgalay xallintooda.

2. — Xoojinta iyo mideynta guud ahaan maskaxda Ummadda, gaar ahaana maskaxda Haweenka Soomaaliyeed, kor u qaadidda garaadkooda Sisyaasiga ah iyo barashada Mabaadi'da Hantiwadaagga ah, Waddanjaceylka iyo Shaqo gudashada.

3. — La dagaallanka caadooyinka gaboobay ee qaybinaya midnimada Ummadda Soomaaliyeed, Biroqaraadiyadda, Afminshaarnimada, Laaluushka, Xatooyada Hantida Ummadda iwm.

4. — Xoojinta dhismaha qoys caafimaad qaba oo wada tashada iyo daryeelidda xannaaneynta Hooyada, carruurta iyo kor u qaadidda barashada Dhaqaalaha Guriga.

5. — Kobcinta maskaxda dhallaanka soo koraya kuna barbaarinaaya fikradaha ixtiraamka waalidka, Jaceylka Waddanka iyo midnimada Soomaaliyeed.

6. — Dhowridda, hirgelinta iyo adkeynta aadaabta iyo anshaxa wanaagsan ee bulshada Soomaaliyeed iyo la dagaallanka waxyaabaha dhaqan iyo dhallaaan geddiska ku ah horukaca Siyaasadeed, Dhaqaale iyo Bulsheed intaba.

7. — Ka qayb galka hawlaha horumarinta Dalka iyo xoojinta hiddaha iyo dhaqanka Soomaaliyeed iyo la dagaallanka caadooyinka xunxun oo xanibaaya horumarka qoyska iyo Bulshada intaba.

8. — abuuridda saldhigga dhaqaale lagu fulinaayo laguna horumarinaayo hawlaha iyo dhaqdhaqaaqa Ururka Dalka gudahiisa iyo dibeddaba iyo abaabulidda Shirar, kulanno, Aqoon-is-weydaarsi iwm.

9.— Xoojinta Xiriirka iyo isbahaysiga ka dhexeeya Haweenka Soomaaliyeed iyo kuwa horusocodka ah ee Adduunka, gaar ahaan kuwa Dalalka Hantiwadaagga.

Qodobka 4aad

Ururka Haweenka Soomaaliyeed wuxuu abaabulaa hawlihiisa, wuxuuna yeelanayaa barnaamij iyo xeer muujinay himilada iyo ujeeddadiisa guud, qaabka dhismihiisa iyo habka maamulka arrimihiisa, oo tixgelinaaya is-beddelka guud ee Dalka ka dhacay curashadii Xisbiga Hantiwadaagga Kacaanka Soomaaliyeed kadib, kuna ballanqaadi kara fulinta barnaamijka Xisbiga iyo ka lib keenidda himiladiisa dambe ooah dhismaha bulsho cusub oo Hantiwadaag ah.

Qodobka 5aad

Xubnaha Xisbiga fulinta ee Ururka Haweenka Soomaaliyeed waxay u gacan bannaan yihiin xilka iyo hawlaha la xiriira dhaqdhaqaaqa iyo abaabulka Ururka Haweenka Soomaalyieed. Xubnahaasi muddada ay hayaan xilka hoggaaminta Ururka Haweenka waxba iska dhimi mayso xaaladdooda dhaqaale iyo horukacaba oo sidoodii hore ayey ugu tiirsanaan doonaan hay'adihii ay ka shaqeynayeen.

Qodobka 6aad

Xeer hoose oo lagu sii faahfaahinaayo Sharcigan laguna hormarinaayo hirgelintiisa, waxaa soo saari doona Madaxweynaha Jamhuuriyadda Dimuqraadiga Soomaaliya.

Qodobka 7aad

Sharci kasta oo ka soo horjeeda Sharcigan ama aan la socon karin ujeeddadiisa waa la baabi'iyey.

Qodobka 8aad

Sharcigani wuxuu dhaqan gelayaa Maalinta uu saxiixo Madaxweynahu waxaana lagu soo saari doonaa Faafinta Rasmiga ah ee Qaranka.

Muqdisho, 3.2.1977

Madaxweynaha Jamhuuriyadda D. Soomaaliya

*(Jaalle Maxamed Siyaad Barre)*

SHARCI L. 19 ee 3 Feb. 1977, dib u cusbooneysiinta dhisidda Xiriirka ururka shaqaalaha Soomaaliyeed.

MADAXWEYNAHA

J. D. S.

ISAGOO ARKAY: Xaashida 1aad, tan 2aad iyo tan 3aad ee Kacaanka 21 Oktoobar 1969;

ISAGOO ARKAY: Sharciga lam. 40 ee 26 Maarso 1972;

ISAGOO ARKAY: Sharciga lam. 19 ee 1da Luulyo 1976 oo ku saabsan ku wareejinta Xukunka iyo Awoodda Dalka Xisbiga Hantiwadaagga Kacaanka Soomaaliyeed;

ISAGOO ARKAY: Horukaca uu gaaray Xiriirka Ururrada Shaqaalaha Soomaaliyeed xagga garaadka Siyaasiga, qaabka dhismaha abaabulka iyo firfircoonida uu ka muujinayey Shirarka iyo hawsha Shaqaalaha heer Qaaradeed, heer Gobol iyo heer Caalami ntaba;

ISAGOO TIXGELINAAYA: Guulihii waaweynaa uu Kacaanku ka gaaray abaabulka iyo diyaargaraynta hawlkareen shaqaale diyaar iyo daacadba u ah ku hoggaaminta hawlaha iyo xilka Ururrada Shaqaalaha ruuxa Barnaamijka Xisbiga Hantiwadaagga Kacaan Soomaaliyeed iyo Falsafadda Kacaanka 21 Oktoobar 1969;

ISAGOO AQOONSADAY: In ay tahay lagama maarmaan in dib loo habeyo Barnaamijka, Xeerka iyo Qaabka dhismaha xariirka Ururrada shaqaalaha Soomaaliyeed si uu u noqdo mid qaab iyo dhuux ahaanba ugu habaysan fulinta Barnaamijka Xisbiga Hantiwadaagga Kacaanka Soomaaliyeed iyo gudashada waajibaadka laga xiisaaray Xilligan cusub;

MARKUU DHEGEYSTAY: Go'aankii Golaha Wasiirrada;

MARKUU ARKAY: Oggolaanshaha guddiga Siyaasiga ee Golaha Dhexe ee Xisbiga Hantiwadaagga Kacaanka Soomaaliyeed.

WUXUU SOO SAARAYAA

SHARCIGA SOO SOCDA:

Qodobka 1aad

Marka laga billaaba 11ka Jaannayo 1977 waxaa dib loo habeeyey dhismaha Xiriirka Ururrada Shaqaalaha Soomaaliyeed.

Qodobka 2aad

Xiriirka Ururrada Shaqaalaha Soomaaliyeed Xaruntiisu waxay noqonaysaa Muqdisho, waxayna ka furan karaan Laamo Gobolada iyo Degmooyinka, Tuulooyinka iyo Xarumaha shaqada oo dhan.



Qodobka 3aad

1. Difaaca Waddanka iyo ilaalinta guulihii Kacaanka 21 Oktoobar 1969; isagoo tixgelinaaya dhibaatooyinkii Dalka yiilley Kacaanka ka hor gaar ahaan kuwii haystay Shaqaalaha iyo sidii uu Kacaanku ugu hawlgalay xallintooda.
2. Kordhinta tacab soo saarka, Xannaanaynta iyo ilaalinta hantida Ummadda, daryeelidda, badbaadinta iyo horumarinta Dadweynaha iyo Shaqaalaha Soomaaliyeed.
3. U hoggaansanka, adkaynta iyo ilaalinta Shuruucda Dalka Goaannada Xisbiga Hantiwadaagga Kacaanka Soomaaliyeed iyo kor u qaadidda garaadka siyaasiga, aqoonta Farsamada iyo Xirfadda Shaqaalaha.
4. Ururinta iyo midaynta Shaqaalaha meel ka wada shaqeeya, kuwa shaqadoodu isku dabeecadda tahay iyo guud ahaan Shaqaalaha Soomaaliyeed, si loogu abuuro kasmo shaqaalannimo Shaqo jacayl iyo Diishibiliin adag.
5. La dagaalanka cadowga ummadda, Mabda'a Kacaanka iyo caadooyinka guracan sida anshaxa iyo Asluubxumida bulshada dhaqan rogga hiddaha iyo astaanta Soomaalinnimo iwm.
6. Isku Xiridda Shaqaalaha Soomaaliyeed iyo Shaqaalaha Dalalka Hantiwadaagga ah iyo Ururrada Shaqaalaha ee Horusocodka ah ee Adduunweynaha.
7. Abuuridda saldhig Dhaqaale lagu fulinaayo laguna horuhawlaha iyo Dhaqdhaqaaqa Urурka Dalka gudihiisa iyo dibeddaba iyo abaabulidda Shirar, Kulanno iyo Aqoon-isweydaarsi iwm.
8. Ka qayb qaadashada ku habaysan maskax caddaaladeed, sinaan iyo hufnaanba maamulka Dawladda, talada wax soo saarka iyo kormeerka goobaha Shaqada si uu xogogaal ugu noqdo habka iyo heerka fulitaanka qorshaha Qaranka iyo Barnaamijka Xisbiga.

Qodobka 4aad

Ururka Shaqaalaha Soomaaliyeed wuxuu abaabulaa wuxuuna yeelanayaa Barnaamij iyo xeer muujinaaya hi o ujeeddadiisa guud, qaabka dhismihiisa iyo habka maamulka oo tixgelinaaya is-beddelka guud ee Dalka ka dhacay cura- Hantiwadaagga Kacaanka Soomaaliyeed kaddib kuna kara fulinta Barnaamijka Xisbiga iyo ka lib keenidda hidambe oo ah dhismaha bulsho cusub oo Hantiwadaag ah.

Qodobka 5aad

Xubnaha Xoghaynta Guud ee xiriirka Urarrada Shaqaalaha, xubnaha Guddiyada fulinta ee Ururrada Shaqaalaha iyo Guddoomiyayaasha Guddiyada Shaqaalaha ee Gobollada waxay u gacan bannaan yihiin xilka iyo hawlaha la xiriira Dhaqdhaqaaqa iyo abaabulka shaqaalaha iyo Kormeeridda goobaha Shaqada.

Xubnahaas muddada ay hayaan xilka hoggaaminta Xiriirka shaqaalaha iyo Ururrada raacsani waxba iska dhimi mayso xaaladdooda dhaqaale iyo horukacaba oo sidoodii hore ayey ugu tiirsanaan doonaan Hay'adihii ay ka shaqaynayeen.

Qodobka 6aad

Xiriirka ururrada Shaqaalaha waxay ku yeelanayaan Wasaaradaha, Wakaaladaha, Warshadaha, Shirkadaha iyo Laamaha Madaxtooyada J.D.S. Xarumaha Mashaariicda dhismaha iyo meel kastoo laga shaqeeyo Guddiyaal Shaqaale oo ka fulinaaya Goobahooda Barnaamijka iyo xeerka xiriirka Ururrada Shaqaalaha Soomaaliyeed.

Hab abaabuleedka iyo qaabka dhismaha guddiyaasha waxaa lagu caddayn doonaa Barnaamijka iyo xeerka Gudaha ee xirriika Ururrada Shaqaalaha Soomaaliyeed.

Qodobka 7aad

Guddiyada shaqaaluhu waxay awood u leeyihiin in ay si buuxda uga qayb galaan talada wax soo saarka iyo maamulka hay'adaha ay ka tirsan yihiin. gaar ahaan waxay awood u leeyihiin in ay

1. Si joogta ah uga qayb galaan Guddiyada Qandaraaska, qorshaha tacabka iyo fulintiisa iyo diyaarinta Miisaaniyadda Sannadka ee Hay'adahooda.

2. Si wax ku ool ah uga mid noqdaan Guddiyada Diishibiliinka, Dalacaadda, Abaalmarinta, Kormeerka Shaqada, Tababarrada iyo deeqaha waxbarashada,, Qorista, Dhisinta, Beddelaadda iyo kala qaybinta Shaqaalaha, samayska meeleynta iyo wax kasta oo la xiriira nolosha iyo maamulka Shaqaalaha iyo Horumarinta Shaqada intaba.

Qodobka 8aad

Xeer hoose oo lagu sii faahfaahinayo sharcigan laguna horumarinayo hirgelintiisa, waxaa soo saari doona Madaxweynaha Jamhuuriyadda Dimuqraadiga Soomaaliya.

Qodobka 9aad

Sharci kasta oo ka soo hodjeeda Sharcigan ama aan la socon karin ujeeddadiisa waa la baabi'iyey.

Qodobka 10aad

Sharcigani wuxuu dhaqan gelayaa Maalinta uu saxiixo Madaxweynuhu waxaana lagu soo saari doonaa Faafinta Rasmiga ah ee Qaranka.

Muqdisho, 3.2.1977,

Madaxweynaha Jamhuuriyadda D. Soomaaliya
*(Jaalle S/Gaas Maxamed Siyaad Barre)*



SHARCI L. 20 ee 3 Febraayo 1977, *Dib-u cusboonaysiinta Dhisidda* Ururka Dhallinyarada Soomaaliyeed.

MADAXWEYNAHA

J. D. S.

ISAGOO ARKAY: Xaashida 1aad, tan 2aad, iyo tan 3aad ee Kacaanka 21 Oktoobar 1969;

ARKAY: Sharciga Lam. 40 ee 26 Maarso 1972;

ARKAY: Sharciga Lam. 19 ee 1da Luulyo 1976 oo ku saabsan ku wareejinta Xukunka iyo awoodda Dalka Xisbiga Hantiwadaagga Kacaanka Soomaaliyeed;

ISAGOO ARKAY: Horukaca uu gaaray ururka Dhallinyarada Soomaaliyeed xagga garaadka Siyaasiga, qaabka dhismaha iyo abaabulka iyo firfircoonida uu ka muujiyey Shirarka iyo hawlaha

e heer Gobol iyo heer Caamali intaba;

Guulihii waaweynaa uu Kacaanku ka gaaray iyo diyaargaraynta hawlkareen dhallinyaro diyaar i u ah hoggaaminta hawlaha iyo xilka Ururka Barnaamijka Xisbiga Hantiwadaagga Kacaanka iyo Falsafadda Kacaanka 21 Oktoobar 1969;

In ay tahay lagama maarmaan in dib Xeerka iyo Qaabka Dhismaha Ururrada si uu u noqdo mid qaab iyo chuux ahaanbarnaamijka Xisbiga Hantiwadaagga Kaiyo gudashada waajibaadka laga xilsaaray

Talada Golaha Wasiirrada;

ARKAY: Oggolaanshaha Guddiga Siyaasiga ee Golaha Dhexe ee Xisbiga Hantiwadaagga Kacaanka Soomaaliyeed.

WUXUU SOO SAARAYAA

SHARCIGA SOO SOCDA:

Qodobka 1aad

billaabo 11ka Jannaayo 1977 waxaa dib loo habeeyey Dhallinyarada Soomaaliyeed.

Qodobka 2aad

Dhallinyarada Soomaaliyeed Xaruntiisu waxay noqonaywuxuuna ka furan karaa laamo Gobollada Degmooyin-Hay'adaha Shaqada oo dhan, Xarumaha waxbara-

Qodobka 3aad

Ururka isagoo fulinaaya Barnaamijka iyo Xeerka Xisbiga Hantiwadaagga Kacaanka Soomaaliyeed ayaa hawlihiisa ugu waaweyn oo loo xilsaaray noqonayaan kuwa soo socda:

1. Difaaca Waddanka iyo ilaalinta guulihii Kacaanka 21 Oktoo. 1969 isagoo tixgelinaya ahibaatooyinka Dalka yiiley Kacaanka ka hor gaar ahaan kuwii haystay Haweenka iyo sidii uu Kacaanku ugu howigalay xallintooda.
2. Ku barbaarinta dhammaan Dhallinyarada Soomaaliyeed waddan jacaylka, Shaqo jacaylka, Kacaannimada iyo barashada Mabaadi'da Hantiwadaagga Cilmiga ah.
3. Midaynta iyo sare u qaadidda kartida iyo aqoonta Siyaasiga ee Dhallinyarada si loogu jaheeyo halganka dhismaha Hantiwadaagga iyo difaaca miraha Kacaanka.
U hoggaansanka, Xoojinta iyo ilaalinta shuruucda Dalka iyo fulinta Barnaamijka Xisbiga Hantiwadaagga Kacaanka Soomaaliyeed.
4. Ka qayb galka hawlaha horumarinta Dalka, isbortiga, fanka iyo Suugaanta, iyo la dagaallanka caadooyinka gurracan sida; Shaqo nacaybka, isla weynida, anshaxumada iyo ku dayashada caadooyinka shisheeyaha ee qalloocan,
5. Ka qayb galka iyo kormeeridda Xarumaha Dhallinta Kacaanka, Ardayda Dugsiyada, Ubaxa Kacaanka isagoo ku abuuraya ficilo kacaannimo iyo garaad dabaqi ah, si ay ula dagaallamaan qabyaaladda, gobolaysiga, biroqraadiyadda iyo dacaayadda aibu-socodka gudaha iyo dibeddaba.
6. Isku Xiridda iyo wada shaqaynta Dhallin yarada Soomaaliyeed iyo kuwa Dalalka Hantiwadaagga ah iyo guud ahaan Ururrada Dhallinyarada horusocodka ah ee Adduunweynaha iyo xoogagga jecel nabadda, xornimada, sinnaanta iyo caddaaladda.
7. Abuuridda saldhig dhaqaale ee lagu fulinayo laguna horumarinaayo hawlaha iyo Dhaqdhaqaaqa Ururka Dalka gudihiisa iyo dibeddaba iyo abaabulidda Shirar, Kulanno, Aqoonisweydaarsi iwm.

Qoobka 4aad

Ururka Dhallinyarada Soomaaliyeed wuxuu abaabulaa hawlihiisa, wuxuuna yeelanayaa barnaamij iyo xeer si cad u muujinaya himilada iyo ujeeddadiisa guud, qaabka dhismihiisa iyo habka maamulka arrimihiisa, oo tixgelinaaya isbeddelka guud ee Dalka ka dhacay curashadii xisbiga Hantiwadaagga Kacaanka Soomaaliyeed kaddib. kuna ballanqaadi kara fulinta Barnaamijka Xisbiga iyo ka lib keenidda himiladiisa dambe oo ah dhismaha bulsho cusub iyo Hantiwadaag ah.



Qodobka 5aad

Xubnaha G ee Ururka Dhallinyarada Soomaaliyeed u gacan yihiin xilka iyo Hawlaha la xiriira Dhaqdhaqaaqa yo abaabu Dhallinyarada. Xubnahaas muddada ay hayaan Ururka Dhallinyarada waxba iska dhimi mayso dhaqaale iyo horukaca oo sidoodii hore ayey ugu tiirhay'adihii ay ka shaqaynayeen.

Qodobka 6aad

Ururka Dhallinyarada Soomaaliyeed wuxuu ku yeelanayaa Hay'-Shaqada oo dhan iyo Xarumaha Waxbrashada Guddiyaal ka fulya goobahooda Barnaamijka iyo Xeerka Ururka ku xusan qodobka 3aad ee isla Sharcigan.

Qodobka 7aad

Xeer hoose oo lagu sii faahfaahinaayo Sharcigan laguna horumahirgelintiisa, waxaa soo saari doona Madaxweynaha Jamhuu-Dimuqraadiga Soomaaliya.

Qodobka 8aad

oo ka soo horjeeda Sharcigan ama aan la socon karin waa la baabi'iyey.

dhaqan uu

Muqdisho, 20.3.1977,

Madaxweynaha Jamhuuriyadda D. Soomaaliya

*(Jaalle S/Gaas Maxamed Siyaad Barre)*

# BOGGA LABAAD

## X E E R

XEER MADAXWEYNAHA J.D.S. ee 5 Feberaayo 77, Magacaabid Wasiirka Wasaaradda Shaqada iyo Amuuraha Bulshada L. 18

MADAXWEYNAHA

J. D. S.

ISAGOO ARKAY: Xaashida 1aad, tan 2aad iyi tan 3aad ee Kacaanka 21 Oktoobar 1969;

ISAGOO ARKAY: Sharciyada lambarkoodu yihiin 17, 18 iyo 19 ee soo baxay 1 Luulyo 1976;

ISAGOO ARKAY: Sharciga Lam. yahay 1 ee soo baxay 1da Luulyo 1976;

MARKUU ARKAY: Qaanuunka ku saabsan Dhismaha Dawladda Lambarkiisuna yahay 14 ee soo baxay 12 Luulyo 1962 iyo beddelaaddii ka dambeeyay;

magacaabo Wasiirka Wasaaradda Shaqada iyo Amuuraha Bulshada;

ISAGOO AQOONSADAY: In ay tahay lagama maarmaan in loo
ISAGOO TIXGELINAAYA: Go'aankii ka soo baxay Golaha Dhexe ee Xisbiga Hantiwadaagga Kacaanka Soomaaliyeed Kalfadhigiisii 3aad.

WUXUU XEERAYAA

Qodobka 1aad

*(Magacaabid Wasiir)*

Marka laga billaabo 3 Feberaayo 1977, Jaalle Sareeye Qaas Jaamac Maxamed Qaalib waxaa loo magacaabay Wasiirka Wasaaradda Shaqada iyo Arrimaha Bulshada.

Qodobka 2aad

*(Dhaqan Gelin)*

Xeerkan wuxuu dhaqan gelayaa 3.2.1977 waxaana lagu soo saari doonaa Faafinta Rasmiga ah ee Dawladda.

Muqdisho, 5.2.1977.

Madaxweynaha Jamhuuriyadda D. Soomaaliya



*MADAXWEYNAHA J.D.S. ee 5 Feb. 1977. Magacaabid Wasiirka Wasaaradda Isboortiga.* L. 19

MADAXWEYNAHA

J. D. S.

ARKAY: Xaashida 1aad, tan 2aad iyo tan 3aad ee Kacaanka 21 Oktoobar 1969;

GOO ARKAY: Sharciyada lambarkiidu yihiin 17, 18 iyo 19 ee soo baxay 1da Luulyo 1976;

ARKAY: Sharciga lambarkiisu yahay 1 ee soo baxay 1 1976;

Qaanuunka ku saabsan Dhismaha Dawladda 14 ee soo baxay 12 Luulyi 1962 iyo bed-

In ay tahay lagama maarmaan in loo asiir Wasaaradda Isboortiga;

Go'aankii ka soo baxay Golaha Dhe- ee Hantiwadaagga Kacaanka Soomaaliyeed kalfadhi-

WUXUU XEERAYAA

Qodobka 1aad

*(Magacaabid Wasiir*

billaabo 3 Feberaayo 1977, Jaalle S/Gaas Faarax magacaabay Wasiirka Wasaaradda Isboor-

Qodobka 2aad

*(Dhaqan Gelin)*

wuxuu dhaqan gelayaa 3.2.1977 waxaana lagu soo Faafinta Rasmiga ah ee Dawladda.

Febaraayo 1977.

Madaxweynaha Jamhuuriyadda D. Soomaaliya

*(Jaalle S/Gaas Maxamed Siyaad Barre)*

XEER MADAXWEYNAHA J.D.S. ee 5 Feb. 1977, Magacaabid Wasiirka Wasaaradda Kalluunka. L. 20

MADAXWEYNAHA

J. D. S.

ISAGOO ARKAY: Xaashida 1aad, tan 2aad iyo tan 3aad ee Kacaanka 21 Oktoobar 1969;

ISAGOO ARKAY: Sharciyada lambarkoodu yhiiin 17, 18 iyo 19 ee soo baxay 1 Luulyo 1976;

ISAGOO ARKAY: Sharciga lambarkiisu yahay 1 ee soo baxay 1da Luulyo 1976;

MARKUU ARKAY: Qaanuunka ku saabsan Dhismaha Dawladda lambarkiisuna yahay 14 ee soo baxay 12 Luulyo 1962 iyo beddelaaddii ka dambeysay;

ISAGOO AQOONSADAY: In ay tahay lagama maarmaan in loo magacaabo Wasiir Wasaaradda Kalluunka;

ISAGOO TIXGELINAAYA: Go'aankii ka soo baxay Golaha Dhexe ee Xisbiga Hantiwadaagga Kacaanka Soomaaliyeed Kalfadhigiisii 3aad.

WUXUU XEERAYAA

Qodibka 1aad

*(Magacaabid Wasiir)*

Marka laga billaabo 3 Feberaayo 1977, Jaalle Inj. Cismaan Jaamac Cali Waxaa loo magacaabay Wasiirka Wasaaradda Kalluunka.

Qodobka 2aad

*(Dhaqan gelin)*

Xeerkan wuxuu dhaqan gelayaa 3.2.1977 waxaana lagu soo saari doonaa Faafinta Rasmiga ah ee Wawladda.

Muqdisho, 5 Feberaayo 1977.

Madaxweynaha Jamhuuriyadda D. Soomaaliya

*(Jaalle S/Gaas Maxamed Siyaad Barre)*



J.D.S. ee 5 Feb. 1977, Magacaabid Wasiirka L. 21

MADAXWEYNAHA

J. D. S.

ARKAY: Xaashida 1aad, tan 2aad iyo tan 3aad ee kacaanka 12Oktoobar 1969;

ARKAY: Sharciyada lambarkoodu yahay 17, 18 iyo 19 ee soo baxay 1da Luulyo 1976;

ARKAY: Sharciga lambarkiisu yahay 1 ee soo baxay 1dii 1976;

Qaanuunka ku saabsan Dhismaha Dawladda 14 ee soo baxay 12 Luulyo 1962 iyo bedde-

AQOONSADAY: In ay tahay lagama maarmaan in loo magacaabo Wasiirka Dawladda ee Madaxtooyada;

TIXGELINAAYA: Go'aankii ka soo baxay Golaha Dhexe ee Xisbiga Hantiwadaagga Kacaanka Soomaaliyeed Kalfadhigiisii 3aad.

WUXUU XEERAYAA

Qodobka 1aad

*(Magacaabid Wasiir)*

laga billaabi 3 Feberaayo 1977, Jaalle Gaashaanle Sare Isaaq waa loo magacaabay Wasiirka Dawladda ee

Qodobka 2aad

*(Dhaqan Gelin)*

Xeerkan wuxuu dhaqan galayaa 3.2.1977 waxaana lagu soo saari oonaa Faafinta Rasmiga ah ee Dawladda.

Muqdisho, 4 Feberaayo 1977.

Madaxweynaha Jamhuuriyadda D. Soomaaliya

*(Jaalle S/Gaas Maxamed Siyaad Barre)*

XEER MADAXWEYNAHA J.D.S. 5 Feberaayo 1977, Magacaabid Wasaaradda Gaadiidka Badda iyo Dekedaha. L. 22

MADAXWEYNAHA

J. D. S.

ISAGOO ARKAY: Xaashida 1aad, tan 2aad iyo tan 3aad ee kacaanka 21 Oktoobar 1969;

ISAGOO ARKAY: Sharciyada lambarkoodu yihiin 17, 18 iyo 19 ee soo baxay 1dii Luulyo 1976;

ISAGOD ARKAY: Sharciga lambarkiisu yahay 1 ee soo baxay 1da Luulyo 1976;

MARKUU ARKAY: Qaanuunka ku saabsan Dhismaha Dawladda lambarkiisuna yahay 14 ee soo baxay 12 Luulyo 1962 iyo beddelaaddii ka dambeysay;

ISAGOO AQOONSADAY: In ay tahay lagama maarmaan in loo magacaabo Wasiir Wasaaradda Gaadiidka Badda iyo Dekedaha;

ISAGOO TIXGELINAAYA: Go'aankii ka soo baxay Golaha Dhexe ee Xisbiga Hantiwadaagga Kacaanka Soomaaliyeed Kalfadhigiisii 3aad.

WUXUU XEERAYAA

Qodobka 1aad

*(Magacaabid Wasiir)*

Marka laga bilaabo 3 Feberaayo 1977, Jaalle Sareeya Gaas Cabdalla Maxamed Faadil waxaa loo magacaabay Wasiirka Wasaaradda Gaadiidka Badda iyi Dekedaha.

Qodobka 2aad

*(Dhaqan Gelin)*

Xeerkan wuxuu dhaqan galayaa 3.2.1977 waxaana lagu soo saari doonaa Faafinta Rasmiga ah ee Dawladda.

Muqdisho, 5 Feberaayo 1977.

Madaxweynaha Jamhuuriyadda D. Soomaaliya

*(Jaalle S/Gaas Maxamed Siyaad Barre)*



5 Feb. 1977, Dhisidda Xoghaynta Guddiga Siyaasadda L. 23

MADAXWEYNAHA

J. D. S.

ARKAY: Xaashida 1aad, tan 2aad iyo tan 3aad ee Kacaanka 21kii Oktoobar 1969.

ARKAY: Sharciyada lam. 17,18 iyo 19 ee 1 Luuliyo 1976, oo ku saabsanaayeen habka Maamulka Dalka.

Sharciyada lam. 14 ee 3 Juunyo 1962 iyo beddka dambeeyay kuna saabsanaa Maamulka Guud ee Dawladda iyo Dhismaha ama Qaabka Xafiiska Madaxtooyad

AQOONSADAY: Inay tahay lagama maarmaan in la dhiso Xoghayn gaar ah u ah Guddiga Siyaasadda.

TIXGELINAAYO: Go'aanka Guddiga Siyaasiga.

WUXUU XEERAYAA

Qod 1aad

*Dhismaha Xoghaynta Guddiga Siyaasadda*

laga bilaabo 3 Febraayo 1977, waxaa la dhisay Xoghayn-Siyaasadda ee Xisbiga Hantiwadaagga Kacaanka Soomaa-

Qodobka 2aad

*Xilka Xoghayaha*

Xoghayaha Guddiga Siyaasadda waxaa loo xilsaaray:

1. Inuu qoro hadallada iyo mawaadiicda shirarka Guddiga
2. Inuu gaarsiiyo Hay'adaha ku shaqa leh wixii go'aanno ah ee Guddiga Siyaasaddu ay gaaraan laysla na garto in la faafiyo.
3. Inuu keydiyo wax alla wixii «Record» ah ee la xiriira hawlaha Guddiga Siyaasadda.
4. Inuu xafido sirta Xafiiskiisa.
5. Inuu qabto wixii kale ee hawl ee loo xilsaaro.

Qodobka 3aad

*(Magacaabidda Xoghayaha)*

Xoghayaha Guddiga siyaasadda waxaa lagu magacaabayaa Dekereeti uu saxiixo Madaxweynaha Jamhuuriyadda Dimuqraadiga Soomaaliya, marka uu ahegeysti talada Guddiga Siyaasadda.

*(Dhaqan Gelid)*

Qodobka 4aad

Xeerkan wuxuu dhaqan gelayaa marka uu saxiixo Madaxweynaha Jamhuuriyadda Dimuqriyadda Dimuqraadiga Soomaaliya, waxaana lagu soo saari doonaa Faafinta Rasmiga ah ee Dawladda.

Muqdisho, 3.2.1977

Madaxweynaha Jamhuuriyadda D. Soomaaliya
*(Jaalle Sar. Gaar Maxamed Siyaad Barre)*



**BOGGA SADDEXAAD**

**TALOOYIN ISGAARSIIN OGEYSIIS IYO WIXII LA MID AH**

MAXKAMADDA GOBOLKA BANAADIR

ARKAY: Dacwadda kor ku qoran;

ARKAY: waxay ku saabsan tahay iyo Bankiga;

ARKAY: Qodobka 69 D.L. 9.9.65 No. 2; lumidda Buugga keydka L.904 si Sh. S. 138.30

WUXUU AMRAYAA

In loo kaydka qaddib markii ay ka soo dekereetada lagu shaaciyo faafinta

WAXAA LA CODSANAYAA

In Buugga cusub ee la samayn doono gacanta laga saaro Nuur Xu-Jimcaale ama qof isla asaga ka sita wakaalad sharci ah, ayadoo muddada 30 maalmood ah ee aan kor ku soo sheegnay.

Muqdisho, 15.2.77.

Guddoomiyaha Maxkamadda Bobolka Banaadir
*(Cabdullaahi Daahir Barre)*

L. 87

MAXKAMADDA DEBMADA BERBERA

MARKAAN ARKAY: weydiinta Cismaan Maxamed Xasan.

MARKAAN ARKAY: Caddaynta Bankiga Ganacsiga Ummadda Berber.a

MARKAAN ARKAY; Qidobka 69 D.L. 9.9.65 N; 2;

Waxaa cad Lumista jeegga Wareega ee lam. yahay 135436. kuna qoran tahay Sh. SO. 1807 ee Bankiga Ganacsiga Ummadda.

Jeeggaas aan kor ku soo sheegnay waxaan amrayaa in loo cusboonaysiiyo mar labaad, muddo 30 beri (soddon beri oo ka billaabata markii lagu dhigo faafinta Rasmiga ah haddaan la helin cid sheegata waana in gacanta laga laga saaro ninka magaciisu kor ku qoran yahay qof ka sita awoodd ama wakaalad sharci ah iyadoo la sugaayo 30 beri.

Berbera 2.2.1977.

Guddoomiyaha Maxkamadda Berbera

*(Shawqi Cilmi Cali)*

L. 88



*MAXKAMADDA GOBOLKA BANAADIR*

HADDUU ARKAY: Dacwadda kor ku qoran;

MARKUU ARKAY: waxay ku saabsan tahay iyo ogeysiiska Bankiga

HADDUU ARKAY: qodobka 69 D.L.9.9. 65 N. 2; lumidda jeegga wareega L. 004599 ku qor tahay Sh. SO. 1.700.

WUXUU AMRAYAA

In loo cusboonaysiiyo jeegga kaddib markii ay ka soo wareegto 15 maalmood maalinta dekereetada lagu shaaciyo Faafinta Rasmiga ah ee dawladda.

WAXAA LA CODSANAYAA

In jeegga cusub oo la samayn doono gacanta laga saaro Maxamed Diiriye ama qof isla asaga ka sita wakaalad sharci ah, ayadoo sugqyo muddada 15 maalmood ah ee oon kor ku soo sheegnay.

Muqdisho, 1.3.1977,

Guddoomiyaha Maxkamadda Gobol. Banqdir

*(Cabdullaahi Daahir Barre)*

L. 88 | Bis

MAXKAMADDA GOBOLKA BANAADIR

GARSOORAYAASHA

Garsooraha Maxkamadda Gobolka Banaadir

HADDUU ARKAY: Arjiga ay soo qoratay Annimaria Nannini.

HADDII UU ARKAY: Arjigii ay soo qoratay Annamaria Nannini oo ka mid ah Shirkadda Beertacabka ee Golweyn (S.R.L. oo saldhiggee-du yahay Shalambood oo ay ku weydiisanayso in Maxkamaddu amar-to inay Shir iskugu yimaadaan xubnaha Shirkadda badamaa uu gee-riyooday keli maamulihii Shirkadda Passoni Orlando si loo maga-caabo maamule cusub.

HADDII UU TIXGELIYO: inay Shirkaddu u baahan tahay in maa-mule cusub loo magacaabo, ka dib kolkii la hubsado inuu geeriyoo-day maamulihii hore ee Shirkadda.

WUXUU AMRAYAA

In ay xubnaha Shirkadda fadhi isugu tagaan saldhiggooda maa-linta bisha Abriil ay tahay 5.4.1977, si loo doorto Maamule cusub, waxaana fadhigaas Guddoomiye ugu magacaabayaa Annamaria Nanni-ni, inta waqtigaa laga gaarayana ayada ayaa Maamule ka ahaanaysa Shirkadda.

Garsooraha Maxkamadda Gobolka Banaadir
*(Dr Axmed Xasan Sseekh)*

Muqdisho, 1.3.1977,

*L. 88/Bis*

SHARCI L. 9 ee 3 Feberaayo 1977, Sharciga ganacsiga dhaqaalaha.

MADAXWEYNAHA

J. D. S.

MARKUU ARKAY: Warqadda 1aad, tan 2aad iyo tan 3aad ee Kacaanka barakaysan;

MARKUU ARKAY; Sharciga lambarkiisu yahay 58 ee 14.9.1970 ee Ilaalinta ascaarta;

MARKUU ARKAY: Sharciga lambarkiisu yahay 12 ee 26.9. 1964 iyo xeerarkiisa kala ah 203 iyo 204 ee la taariikhda ah ee ganacsiga iyo Dhaqaalaha;

MARKUU ARKAY: Sharciga lambarkiisu yahay 12 ee 1.8.1966 ee ilaalinta Canshuuraha;

MARKUU ARKAY: Sharciga lambarkiisu yahay 54 ee 10.9.1970 ee dhawritaanka badbaadada ummadda;

MARKAY U MUUQATAY: In ay tahay lagama maarmaan in dadweynaha laga nabadgeliyo cunaqabataynta iyo cadaadinta, ku dulnoolaashaha salka ku haysa ee uga imaanaysa ganacsiga, maamulka iyo qaybinta waxyaabaha dadweynuhu aad ugu baahan yahay;

MARKUU TIXGELIYEY: baahida loo qabo daryeelka caafimaadka Dadweynaha iyo Nabadgelyadiisa;

ASAGOO TIXGELIYEY: Go'aankii Guddiga Siyaasadda iyo Golaha Wasiirrada;

WUXUU GUDOONSHAY

SHARCIGA SOO SOCDA;

Qodobka 1aad

Macnayn

Waxyaabaha Dadweynuhu u baahan yahay: Waxaa loola jeedaa, waxyaabaha la cuno ama la cabbo oo dhan, dharka, maacunta, daawada dadka iyo duunyada, alaabta dhismaha oo dhan, shidaalka, iyo wax kasta oo laga ganacsado.

Ganacsi xaaraan ah: Waxaa loola jeedaa, ganacsi kasta dabeecad ahaan ama qiima ahaanba u khalifsan sicirka loo gooyey ama loo yaqaan, waxyaabaha lagu tilmaamay xubinta hore oo sharcigan.

Qodobka 2aad

Haddii aan si kale loo micnayn, xabgudub kasta oo laga galo sharcigan waxaa loo aqoonsanayaa dembi ay awood u leedahay qaadistiisa Maxkamadda Badbaadada Dalku.

## Qodobka 3aad

Qof kasta oo ganacsato ah ama loo xilsaaray hawsha guud ama gaar ee maamulka qaybinta waxyaabaha dadweynuhu u baahan yahay ee ku iibiya qiimo dheeraad ah ama ka badan kii ay Dawladda u goysay, ama urursada ama qariya ama baab'iya iyo qof kasta oo gacan ku siiya waxyaabaha hore lagu soo sheegay oo isla xubinta ku yaal, ama lagu helo haysashada alaabtaas, wuxuu galayaa dembi kontrobaan waxaana lagu ciqaabayaa:

b) 3 ilaa 18 bilood oo xarig ah ama Sh. SO. 3.000 ilaa 8.000 oo ganaax ah, haddii sheyga dembiga uagu galay aannu qiimihiisu ka badnayn 1.000 (kun) Shilin;

t) 6 bilood ilaa 2 sano oo xarig ah ama Sh. SO. 6.000 ilaa 24.000 oo ganaax ah, haddii sheyga dembiga lagu galay uu qiimihiisu u dhexeeyo 1.001 shilin ilaa 5.000 (kun-shan kun)

j) 1 ilaa 5 sano oo xarig ah ama Sh. SO. 15000 ilaa 50.000 oo ganaax ah, haddii sheyga dembiga lagu galay uu qiimahiisu gaaraayo 5.001 ilaa 50.000 (shan kun iyo kow-konton kun);

x) 3 ilaa 10 sano oo xarig ah ama Sh. SO. 30.000 ilaa 60.000 oo ganax ah, haddii sheyga dembiga lagu galay uu qiihimiisu u dhexeeyo Sh. SO. 50.001 ilaa 100.000 (kunton kun iyo kow - boqolkun)

kh) 5 ilaa 25 sano oo xarig ah ama Sh. SO. 50.000 ilaa 150.000 oo ganaax ah, haddii sheyga dembiga lagu galay uu qiimahiisu ka badan yahay Sh. SO. 100.000 (boqolkun).

2. Haddii badeecadda lagu tilmaamay qodobka 1aad qaybtisa hore sharcigan qiimaheeduna gaarayo Sh. SO. 100.000 qiimaheeda kor u qaadiddiisa, qarinteeda, iyo ururiskeeda looga jeedo, in lagu cuuryaamiyo, la qaso xaaladda dhaqaalaha ee dalka, la iska horkeeno dawladda iyo dadweynaha, ama laga dhaliyo qas iyo jahawareer dalka gudihiisa, ciqaabta waxa la gaarsiin karaa Xabsi daa'im ama dil. hadba sifaalaha dembigu siduu yahay.

## Qodobka 4aad

Qof kasta oo xil ka saaran yahay ilaalinta, kormeeridda, fulinta ama ogaada jebinta sharcigan oo aan ka badan waajibka ka saarnaa ama aan soo gaarsiin hay'adaha ku shaqaaa leh, haddii uusan dembiga ka qayb gelin, waxaa lagu ciqaabayaa ilaa 5 sano oo xarig ah, ama ciqaabo lacageed oo ah ilaa 5.000.

## Qodobka 5aad

Guddiga Xisbiga ee Gobolka ama Degmada, Booliska iyo Nabadsugidda waxay ka dalban karaan qof kasta oo ganacsato ah inuu uga soo warramo waxa dadweynuhu aad ugu baahan yahay oo uu hayo ama iibiyo ama meel kale ugu kaydsan.

3) Qofkii raaci waaya codsashada Hay'adahaas ee warbixin ka keeni waaya waxa uu hayo ee ku tilmaaman xubinta kore mudda 14 (afar iyo toban) maalmood aan ka badnayn ama been ka sheega warbixintiisa wuxuu gelayaa dembi, waxaana lagu ciqaabi karayaa ilaa (Hal) sano oo xarig ah ama ciqaab lacageed oo ah 12.000 ama labadaba.

## Qodobka 6aad

qof kasta oo dalka soo geliya ama lagu helo isagoo ku haysta ama ka ganacsanaya badeeco laga mamnuucay Waddanka, sabab caafimaad, dhaqaale ama nabadgelyo awgeed, wuxuu gelayaa dembi culus ciqaabtiisuna tahay 2 ilaa 10 sano oo xarig ah ama ciqaab lacageed ilaa Sh. SO. 24.000.

## Qodobka 7aad

Gaadiidka lagu helo isagoo sida ama loo isticmaalay soo gelinta waddanka, badeeco dalka laga mamnuucay, daryeelka caafimaadka dadweynaha, ka hortagga cudurro halis ah, dhaqaalaha iyo nabadgelyada awadeed. haddii qofka gaadiidka wata ama leh uusan caddayn inuusan xog ogaal u ahayn badeecadda mamnuuca ah ee uu sido, qiimaha iyo tirada badeecaddu inkasta ha la ekaatee, gaadiidka waa laga dhacayaa cidda leh ama wadata, waxaana la wareegaya dawladda.

## Qodobka 8aad

Qof kasta oo lagaga xukumay ciqaab xarig ah oo aan ka badnayn 10 sanadood dembi uu dhigayo sharcigaanu. waxaa loo oggolaanayaa inuu xabsiga ku beddesho Lacag. hadduu dembigu yahay kii ugu horreeyey oonooc iisa ah ee uu galay.

## Qodobka 9aad

Badeecadda iyo daawada dembiga lagu galay ee lagu qabtay eedeysanaha ama wakiilkiisa waa lala wareegayaa, khasnadda dawladdaana lagu shubayaa wixii ka soo baxa, shatigana waa lagala noqon karaa.

## Qodobka 10aad

axaa la baabi'iyey sharciga lambarkiisu yahay 58 soona baxay sharcigii iyo xeerarkii kale ee ka soo horjeeda ama aan

## Qodobka 11aad

Sharcigan wuxuu dhaqan gelayaa 15 maalmood kaddib maalinta Madaxweynaha Jamhuuriyadda Dimuqraadiga Soomaaliya.

## Qodobka 12aad

Waxaa la farayaa qof kasta inuu u hoggaansamo sharcigan cid walbana ka doono inay u hoggaansanto.

Sharcigan waxaa lagu soo saari doonaa Faafinta rasmiga ah ee Dawladda.

Muqdisho, 3 Febraayo 1977.

Madaxweynaha Jamhuuriyadda D. Soomaaliya
*(Jaalle S/Gaas Maxamed Siyaad Barre)*